

FGM/C ama gudniinka fircooniga ah waxa looga jeedaa jaridda qeyb ama si guud ahaaneed ee xubinta taranka dumarka ama dhaawac kale ee xubnaha taranka dumarka midkaasoo aanan wax faa'iido ah oo caafimaad aanan lahayn. Waxa loogu yeedhi karaa "gudniinka dumarka" qeyb aduunka ka mida. Dhaqanku wuxuu keeni karaa dhibaatooyin badan oo jidheed iyo caafimaad maskaxeed Si degdeg ah amaba xilliga fog.

Waa maxay waxyeellooyinka caafimaad ee gudniinka fircooniga ah (FGM/C)?

Dhibaatooyinka degdega waxa ka mida:

- Xanuuun daran
 - Dhiig dheeraad ah (dhiigbax)
 - Bararka nudaha xubinta taranka
 - Xumad
 - Caabuqyo sida teetano
 - Dhibaatoovinka
 - dhanka kaadida
 - Dhibaatooyinka bogsasho dhaawac
 - Dhaawaca nudaha ku wareegsan xubinta taranka
 - Argagax
 - Dhimasho

Dhibaatooyinka mudada-dheer waxa ka mida:

- Dhibaatooyinka kaadida (xanunka kaadida, caabuq kaadi marenka ah)
 - Dhibaatooyinka xubinta taranka (dheecaan, cuncun, bakteeriya xubinta ah iyo caabuqyo kale)
 - Dhibaatooyinka caado (xanun caadada ah, ku adkaansho in dhiiga caadadu yimaado, iwm)
 - Nabar nudaha iyo boogta
 - Dhibaatooyin galmo (xanuu wakhtiga galmada, dareen hooseeya, iwm)
 - Khatar korodhay oo dhibaatooyinka dhalmada ah (caqabad umulitaan, dhiig dheeraada, qaliin, naqas xiranka ilmaha, iwm) iyo dhimasho ilmaha dhalanaya
 - Baahida qaliino danbe
 - Dhibaatooyin cilmi-nafsi (niyadjab, walwal, walaac maskaxeed, kalsooni vari.)

Macluumaad dheeriya oo khuseeya caqabadaha caafimaad ee gudniinka fircooniiga ah (FGM/C), fadlan booqo wabsaaydka Haayada Caafimaadka Aduunka <https://www.who.int/news-room/fact-sheet/detail/female-genital-mutilation>

**Wac Khadka Caawimaada
Xadgudubka Caruurta
Childhelp ee
800-4-A-CHILD
(800-422-4453) wixii
macluumaada ama caawimo
ah haddii:**

- Aad aamisan tahay inaad khatar ugu jirtid FGM/C;
 - Aad martay FGM/C;
 - Aad su'aalo ka qabtid FGM/C;
 - Aad maclumaad ka haysid qof ku sameynaya FGM/C Mareykanka; ama
 - Aad garanaysid qof khatar ugu jira FGM/C Mareykanka ama wadan kale.

Waxaad xaq u yeelan kartaa socdaalka dibadda ah ee loogu tala galay dhibanayaasha danbiga ama dacwada haddii aad martay gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) ama aad ka baqaysid khatarta gudniinka fircooniiga ah (FGM/C).

**Macluumaa dheeriya, booqo:
[uscis.gov/humanitarian/female- genital-
mutilation-or-cutting-fgmc](http://uscis.gov/humanitarian/female-genital-mutilation-or-cutting-fgmc)**



U.S. Citizenship and
Immigration Services

**Gudniinka ama
Jarida Xubinta
Taranka Dumarka
ama sida loo
yaqaanno
gudniinka
fircooniga ah
(FGM/C)**



U.S. Citizenship and Immigration Services

Haddii aad martay gudniinka fircooniiga ah (FGM/C):

- Maaha qaladkaaga.
- Maa aanad jabin sharciga Mareykanka adoo maraya nidaamkaa.
- Si xun uma saameyn doonto ku haboonaanshahaaga u socdaalka Mareykanka ama inaad heshid kabka socdaalka ee Mareykanka.

Cilmi-baadhayaasha Xarumaha Xakameynta iyo Hortaga Xanuunada Qeybta Caafimaadka Taranka (CDC) ayaa ku qiyaasay in wax badan ilaa

500,000

hablood iyo dumar Mareykanka ku nool ay mareen gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) wakhti hore ama khatar ugu jiraan inay maraan hadda gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) mustaqbalka.

Waxka badan

200 milyan oo hablood iyo dumar nool

maanta ayaa loogu guday qaabkaan **30** dal

oo Afrika, Bariga Dhexe iyo Eeshiya ku yaal halkaasoo gudniinka fircooniiga ah (FGM) xooga la saaro.

Marka la gaadho 2030, haddii dhaqanku kusii socdo heerka hada,

4.6 milyan oo hablood ayaa khatar ugu jiri doona gudniinka fircooniiga ah (FGM) sanadkasta.

Dawlada Mareykanku waxay diidaysaa gudniinka fircooniiga ah (FGM/C.)

Dawlada Mareykanku waxay diidaysaa gudniinka fircooniiga ah (FGM/C), nooc kastaba, heerkasta, ama siduu doono ha u darnaadee, oo sababkastaba ha loo sameeyee. Dawlada Mareykanku waxay fahamsan tahay in gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) la fulin karo iyadoo la raacayo dhaqano la aamisan yahay oo ka qeyb ah caadooyinka dadka waaweyn. Haseyeeshee, dawlada Mareykanku waxay u aqoonsan tahay gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) inuu yahay ku xadgudub xuquuq binaadamo oo daran, iyo nooc rabshad jinsi iyo xadgudub caruureed ah.

Mareykanka wax aka go'an soo-afjarida FGM/C.

Soo-afjarida FGM/C waa ka qeyb dadaalada dawlada Mareykanka ee lagu ilaalinayaay caafimaadka iyo badqabka dumarka iyo hablaha iyo kor u qaadista xuquuqdooda. Dawlada Mareykanku waxay ka shaqeynaysa Mareykanka iyo wadamada kale si ay u barto dadka dhibaatooyinka, dhaawacyada iyo saameynta gudniinka fircooniiga ah (FGM/C).



Haddii aad:

- Aaminsan tahay inaad khatar ugu jirtid gudniinka fircooniiga ah (FGM/C);
- Aad martay gudniinka fircooniiga ah (FGM/C);
- Su'aalo aad ka qabtid gudniinka fircooniiga ah (FGM/C);
- Aad su'aal ka qabtid khuseeya sameynta gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) ee Mareykanka dhexdiisa; ama
- Aad garanaysid qof khatar ugu jira gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) Mareykanka dhexdiisa ama dal kale;

Fadlan la xidhiidh wixii macluumaada ama caawimo ah:

- Khadka Xadgudubka Carurta ee Childhelp: 800-4-A-CHILD (800-422-4453)
- Shabakada Soo-afjarida gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) ee Mareykanka: endfgmnetwork.org

Wsharci darro in Mareykanka dhexdiisa in la isku dayo in lagu sameeyo gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) Mareykanka dhexdiisa qof ka yar da'da 18, ama in loo qaado gudaha ama dibada Mareykanka si gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) loogu sameyn karo. Waxay kasoo horjeedaa sharciga Mareykanka in waalidiinta ama masuuliyiinta sharci ogolaadaan ama fududeeyaan gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) ilmo yar.

Jabinta sharcigu waa ciqaab ilaa 10 sano oo xabsi, ganaax, ama labadaba. Majirto qil amase marmarsiyo kale oo fasaxeysa sameynta gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) dhaqan ama caado toona. gudniinka fircooniiga ah ama nidaamyada kale ee keenaya dhaawacyo xubnaha taranka dumarka ee gabadh ka yar 18 waa laga mabnuucay sharciga Mareykanka. Waxa intaasi dheer, qofkasta oo jooga Mareykanka oo ku sameeya gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) gabadh 18 sano jir ah am aka weyn iyadoon ogolayn in lagu eedayn karo danbi.

Jabinta sharciga ka dhanka ah gudniinka fircooniiga ah (FGM/C) wuxuu yeelan karaa xayiraad safar ama dhibaato dhanka imagareeyshanka ah.

Sameynta ama caawinta gudniinka fircooniiga ah (FGM/C), xataa iyadoon danbi lagu helin, waxay yeelan kartaa cawaqib socdaal, oo ay ku jiraan in dalka soo galistiisa laguu diido ama in laga saaro Mareykanka ama dhibaatooyinka kale oo la xiriiro arrintaas.